Mowduuca: Xeerka Caafimaada Deeqda (Deeqda Daryeelka) ee SHS	**Lambarka Caymiska:** PSJH RCM 0002 SHS	
Waaxda: Mareegta Maaraynta Dakhliga	☒ Cusub ☐ Dib loosaxay ☐ Dib u eegis lagu sameeyay	**Taariikhda:** 3/22/2019
Maalgaliyaha Fulinta: Kimberly Sullivan, SVP Madaxa Xafiiska Mareegta Dakhli Aruurinta	**Mulkiilaha Caymiska:** Lesa Ellis, Madaxa Talobixinta iyo Caawimaada Dhaqaalaha	
Ansixiyaha: Gudigga Agaasimayaasha PSJH	**Taariikhda Dhaqangalinta:** 5/1/2019	

Swedish Health Services (Adeegyada Caafimaadka Sweden) iyo Swedish Edmonds ("SHS" ama "Swedish") waa urur caafimaad oo samo fal ah kaasoo kushaqeeya hadafka Shaqadiisa oo ah kor uqaadista caafimaadka iyo badbaadada qofkasta oon u adeegno, Mabaadii'da ururka oo ah badbaado, daryeel bukaanka diirada lagu saaraayo, qadarin, daryeel iyo naxariis, wadashaqayn iyo iskaashi, waxbarasho iyo hormarin joogto ah iyo hogaamin, iyo mabda'a ah in daryeelka caafimaadku uu yahay xuquuqda aadamaha. Waa mabda'da iyo shaqada isbitaal kasta oo katirsan SHS in adeegyada degdega ah iyo daryeeka caafimaad ahaan muhiimka ah ay diyaar unoqdaan shaqsiyaadka katirsan bulshooyinka aan u adeegno, ayadoon loo eegayn awooda ay uleeyihiin bixinta qarashka.

CABIRKA SHAQADA:

Xeerku wuxuu qabanayaa isbitaalada SHS iyo dhamaan adeegyada degdega ah, dhakhsaha loogu baahan yahay iyo kuwa kale ee caafimaad ahaan muhiimka ah ee ay bixiyaan isbitaalada SHS (marka laga reebo daryeelka tijaabada iyo baarista ah). Liiska isbitaalada SHS ee xeerkaan kujira waxaa laga heli karaa Tusmada A ee Liiska Xarumaha Xeerkan Kujira.

Xeerkan waa in loo turjumaa qaab waafaqsan Qodobka 501(r) Xeerka Dakhliga Gudaha 1986, ee wax ka badalka. Haddii ay iska hor yimaadaan fulinta sharciyada noocaas ah iyo xeerkan, sharciyada noocaas ah ayaa laraacayaa.

UJEEDADA:

Ujeedada xeerkan waa in laxaqiijiyo in loofuliyo Caawimaada Dhaqaalaha (Deeqda Daryeel) si cadaalad ah, aan takoor lahayn, waxtar leh, kuna dhisan qaab nidaamsan lana siiyaa shaqsiyaadka xaqa uleh kuwaasoo aan awoodin inay u gudbiyaan si buuxda ama qayb ahaan adeegyada caafimaad ahaan muhiimka ah ee degdega ah iyo adeegyada kale ee isbitaalka oo ay baxshaan isbitaalada SHS.

Waa shaqada xeerkan inay waafaqdo sharciyada heer federaal, heer gobal, iyo kuwa maxaliga ah. Xeerkan iyo barnaamijyada caawimaada dhaqaaluhu waxay halkan ka cadaynyaan Xeerka Rasmiga ah ee Caawimaada Dhaqaalaha ('FAP') iyo Xeerka Daryeelka Daryeelka Caafimaadka Degdeg ah oo lagu dhaqaayo isbitaal kasta oo ay leedahay, u kirayso ama ay kashaqayso SHS.

Xeerka:

SHS waxay siinaysaa adeegyada isbitaalka oo bilaash ah ama raqiis ah bukaanada xaqa uyeesha ee danyarta ah, kuwa aan caymiska lahayn iyo kuwa caymiska kufilan aan haysan marka awooda bixinta qarashaadka adeegyadu ay caqabad kunoqoto helitaanka adeegyo degdeg ah oo caafimaad ahaan muhiim ah iyo adeegyada kale ee daryelka isbitaalka aan lahelin il kale oo dhaqalaaha adeegyada kadhiibta. Bukaanadu waa inay buuxshaan shuruudaha uqalmida caawimaada ee ku qeexan xeerkan si ay uhelaan caawimaada.

Isbitaalada SHS oo leh waaxaha xaaladaha degdeg ah ayaa siinaysa, ayadoon cidna takoorin, daryeelka xaaladaha caafimaad ahaan degdega ah (kuwaasoo kujira macnaha ku qeexan Sharciga Daawaynta

Caafimaadka Degdega ah iyo Shaqaalaha) si waafaqsan awoodaha isbitaaladu haystaan, ayadoon laga fiirinayn in qofku uu xaq uleeyahay caawimaad dhaqaale iyo inkale. SHS cidna uma takoorayaan sababo la xariira da'da qofka, isirkiisa, midabkiisa, caqiidadiisa, qoomiyadiisa, diintiisa, wadanka uu kasoo jeedo, xaaladiisa guur, jinsigiisa, dookhiisa galmada, aqoonsigiisa jinsiyadeed ama dareenkiisa jinsi, naafadiisa, xaaladiisa milatari ama halyeey dagaal, ama sabab kasta oo kale oo xaaraan ku ah sharciga federaalka, gobalka, ama sharciga maxaliga ah markay gaarayaan go'aanada la xariira caawimaada dhaqaalaha.

Isbitaalada SHS waxay bixinayaan baaritaano caafimaad oo degdega ah iyo daawaynta xanuunka, ama waxay ugudbinayaan una wareejinayaan qofka meelkale haddii wareejinta noocaas ah ay waafaqsantahay xeerka 42 C.F.R 482.55. SHS waxay xarimaysaa talaabooyin kasta, dhaqanada dhanka aqbalaada bukaanka, ama xeerkarka kuwaasoo kahor istaagaaya shaqsiyaadka inay dalbadaan adeegyada caafimaad ee degdega ah, sida in la ogolaado shaqooyinka soo aruurinta daynta kuwaasoo faragalin ku ah bixinta daryeelka caafimaad ee degdega ah.

Liiska Adeeg Bixiyaasha kujira xeerka SHS FAP: Isbitaal kasta oo katirsan SHS wuxuu aqoonsanayaa liiska dhakhaatiirta, kooxaha caafimaadka, ama khubarada kale ee bixinaaya adeegyada kuwaasoo aan kujirin xeerkan. Isbitaal kasta oo SHS katirsan ayaa siinaaya liiskaan bukaan kasta oo codsada nuqul kamid ah. Liiska adeeg bixiyayaasha waxaad sidoo kale kaheli kartaa websayka SHS: www.swedish.org.

Shuruudaha Uqalmida Caawimaada Dhaqaalaha: Caawimaada Dhaqaaluhu way ufuran tahay labadaba buukanada iyo wakiiladooda caymiska leh iyo kuwa aan caymiska lahayn ilaa inta caawimaada noocaas ah ay waafaqsan tahay xeerkn iyo sharciyada federaalka iyo gobalka kuwaasoo maamulaaya gunooyinka lasiinaayo bukaanada. Isbitaalada SHS ayaa samaynaaya dadaalada kuhaboon si ay go'aan uga gaaraan jiritaanka iyo jiritaan la'aanta caawimaad bukaanku kahelo qolo sadexaad taasoo laheli karo, guud ahaan qarashka ama qayb kamid ah, ee daryeelka ay bixiyeen isbitaalada SHS, kahor intaysan amrin in lacagta lagasoo qaado bukaanka.

Bukaanada Raadinaaya caawimaad dhaqaale waa inay buuxiyaan Codsiga Caadiga ah eeC aawimaada Dhaqaalaha ee SHS uqalmidana waxaa lagu salaynayaa baahida dhaqaale laga bilaabo taariikhda adeegga labaxshay ama taariikhda codsiga lasoo diray, midkii kuhaboon. Bukaanada ayaa markale codsan kara caawimaada haddii xaaladahooda dhaqaale kasii daraan muddo kadib, xataa hadii codsigii hore ladiiday ama qayb ahaan la aqbalay. Dadaalo macquul ah ayaa lasamayn doonaa si loo ogaysiiyo loona wargaliyo bukaanada helitaanka Caawimo Dhaqaale ayadoo lasiinaayo macluumaadka inta lagu jiro xiliga lakeeno isbitaalka iyo markay kabaxayaan, ama macluumaad qoran oo kusaabsan biilka ama aruurinta biilka, ayadoo lagu siinaayo meelaha macluumaadka biilka ama adeegyada dhaqaalaha ee ay bukaanadu gali karaan, webseyka isbitaalada SHS, ogaysiis afka ah marka laga hadlaayo bixinta qarashaadka adeegyada, iyo sidoo kale boorka lagusoo dhajiyo xaga bukaan jiifka iyo bukaan socodku arki karaan, sida waaxda aqbalaada iyo xaaladaha degdega ah. Turjumaada ayaa lagu diyaarinayaa luuqad kasta oo ay kuhadlaan wax kabadan toban boqolkiiba bulshada kudhaqan xagaa adeegga isbitaalku gaaro.

Codsashada Caawimaad Dhaqaale: Bukaanada ama wakiiladoodu waxay codsan karaan ayna diri karaan Codsiga Caawimaada Dhaqaale, kaasoo lacag la'aan ah lagana heli karo xarunta SHS ama lagu heli karo qaababka soosocda: shaqaalaha talo bixinta adeegyada bukaanka marka lagaaro ama kahor waqtiga isbitaalka aad kabaxayso ayadoo caawimaada lagu codanaayo laguna gudbinaayo dukumiintiyo dhammaystiran; in lagusoo diro boostada, ama inaad booqato www.swedish.org, adoo soo dagsanaaya kadibna buuxinaaya oo diraaya foomka codsiga oo ay lasocdaan dhukumantiyada cadaynta ah. Qofka codsanaaya caawimada dhaqaalaha waxaa lasii nayaa baaritaan hor dhac ah, kaasoo ay kujirayaan dib u eegista in bukaanku waayay ama aan uqalmin ilaha dhaqale bixinta oo uu kahelo qolo sadexaad.

Isbitaal kasta oo katirsan SHS ayaa shaqaale gaar ah udiyaarinaaya inay kugacan siiyaan bukaanada buuxinta Codsiga Caawimaada Dhaqaalaha iyo inay go'aan ka gaadhaan uqalmida caawimaada dhaqaale ee SHS ama caawimaad dhaqaale oo ay kahelaan barnaamijyada caymiska dawladu maalgaliso, haday heli karaan. Adeegyada turjumaada ayaa diyaar ah si looga jawabo su'aalaha ama walaacyada loogana caawiyo bukaanka buuxinta Codsiga Caawimaada Dhaqaalaha.

Bukaan ama wakiilkiisa kaasoo xaq uyeelan kara inuu codsado caawimaad dhaqaale ayaa ukeeni kara

dukumiintiyo kufilan SHS si ay uga taageeraan kago'aan gaarista uqalmida xili kasta oo ay ogaadaan in dhaqalaaha qofku kahooseeyo heerka ugu hooseeya FPL si waafaqsan Xeerarka Federaalka iyo kuwa Gobalka.

SHS waxay xaqiijinaysaa in si waafaqsan sharciga Washington Administrative Code (WAC, Xeerka Maamulka Washington) 246-453-020, go'aaminta uqalmida caawimaada la samayn karo markasta oo la ogaado in dhaqaalaha qofku kahooseeyo 200% heerka cabirka saboolka ee federaalka. Waxaa intaas sii dheer, SHS ayaa dooran karta inay caawimaad dhaqaale siiso ayadoo kaliya kusalaynaysa go'aankii horay looga gaaray xaalada bukaanka oo loo aqoonsaday qof faqiir ah, sida kucad sharciga WAC 246-453-010. Marka xaalad noocaan ah jirto, looma baahna dukumiintiyo.

Xaalada Dhaqaalaha ee Qofka: Dhaqalaaha, hantida ma guurtada ah ee lacagta laxariirta iyo qarashaadka kubaxa bukaanka ayaa loo adeegsan doonaa in lagu qiimeeyo xaalada shaqsiga ah ee bukaanka. Marka laga fiirsho ujeedooyinka FAP Washington ee kuqeexdaa dhaqalaha iyo qoyska si waafaqsan xeerka WAC 246-453-010. Hantida maguurtada ah ee lacageed waa inaan lagusoo darin kaydka hawlgabka ama lacagta caymiska magdhawga shaqaalaha kuwaasoo uqalma Xeerka Dakhliga Gudaha iyomidna caymisyada kaydka aan uqalmin. Hantida lacageed looma adeegsan doono go'aaminta uqalmida haddii dhaqaalaha bukaanka ama wakiilkiisu uu ku egyahay ama kahooseeyo 200% heerka cabirka fakhriga ee fderaalka.

Shuruudaha Dhaqaalaha: Shardiga dhaqalaaha, oo kusalaysan Heerka Fakhriga ee Federaalka (FPL), ayaa loo adeegsan karaa kago'aan gaarista uqalmida daryeel bilaash ah ama lacag yar lagaaga qaadaayo Fadlan fiiri Tusmada B si aad faahfaahin uga hesho.

Go'aaminada iyo Ansixinada: Bukaanadu waxay heli doonaan ogaysiiska go'aaminta uqalmida FAP 14 maalin gudahood Markay gudbiyaan Codsiga Buuxa ee Caawimaada Dhaqaalaha iyo dukumiintiyada muhiimka ah. Marka codsigu nasoo gaaro, talaabooyinka dayn aruurinta xad dhaafka ah waa lajoojinayaa ilaa go'aanka laga gaaro uqalmida oo qoran loodiro bukaanka. Isbitaalku go'aan kama gaari doono uqalmida caawimaada asagoo raacaaya macluumaad uu isbitaalku aaminsanyahay inuusan sax ahayn ama aan la aamini karin.

Xalinta Khilaafka: Bukaanka ayaa racfaan kaqaadan kara go'aanka lagasoo saaro uqalmida caawimaada dhaqaalaha asagoo ukeenaaya isbitaalka dukumiintiyo arrinta laxariirta oo dheeraad ah 30 maalmood gudahood markuu helo ogaysiiska diidmada. Dhammaan racfaanada dib u eegis ayaa lagu samaynayaa haddii dib u eegistu xaqiijiso diidmadana, ogaysiis qoran ayaa loodirayaa wakiilka bukaanka iyo Department of Health (Waaxda Caafimaadka), markii loo baahdo, iyo si waafaqsan sharciga. Hanaanka ugu danbeeya ee racfaanku wuxuu kusoo dhammaanayaa 10 maalmood gudahood laga bilaabo marka uu kusoo gaaro diidmada isbitaalku. Racfaanka waxaa loodirayaa Swedish Medical Center, Attn: Corporate Business Office, 747 Broadway, Seattle, WA 98122.

Deeq Kaalmaamo ah: SHS ayaa u ogolaan karta bukaanka kaalmo deeq ah taasoo lagu kabaayo baaqiga koontadooda ayadoo lagu siinaayo qaabab kabaxsan codsiga Caawimaada Dhaqaalaha ee buuxa. Go'aanka noocaas ah waxaa lagu salaynayaa aasaasiyaad kaalmo ah ayadoo la adeegsanaayo hanaan haayadu leedahay oo wax lagu qiimeeyo kaasoo qiimaynaaya awooda qarash bixinta ayadoo laraacaayo diwaanada dawlada ama diiwaanada kale ee dhaqaalaha, ayna kujiraan laakiin aan kukoobnayn dhaqaalaha qoyska, tirada dadka qoyska, iyo taariikhda daynta iyo qarash bixinta qofka.

Xaaladaha Kale ee Gaarka ah: Bukaanada uqalma barnamaijyada hoos taga FPL sida Medicaid iyo barnaamijyada kale ee caawimaada danyarta oo dawladu maalgaliso, ayaa loo aqoonsadaa inay yihiin dad faqiir ah. Sidaas awgeed, bukaanada noocaas waxay xaq uleeyihiin Caawimada Dhaqaalaha marka barnaamijyadu diidaan inay bixiyaan qarashka kadibna loo arko in qarahaadku yihiin kuwo laga bixin karo bukaanka. Baaqiyada koontada bukaanka ee ka yimaada qarashaadka aan loosoo celin ayaa xaq uleh in laga bixiyo lacagta. Qarashaadka sida gaarka ah ugu jira kuwa uqalma ayaa ah qarashaadka laxariira arimaha soo socda:

- Joogitaanada bukaan jiifka ah ee la diiday
- Maalmaha daryeelka bukaan jiifka loo diiday
- Adeegyada aan laga bixin bukaanka
- Diidmooyinka Ogolaanshaha Kahor Daawaynta

- Diidmooyinka kadhashay caymiska xadidan

Qarashaadka Caafimaad ee Xad dhaafka ah: SHS, intay awoodo, waxay deeq siin ku bixin kartaa marka bukaanka lagu yeesho lacag daryeelka caafimaadka ah oo xad dhaaf ah. Bukaanadan waxaa loola macaamilayaa si shaqsi ah.

Yaraynta Qarashaadka Dhammaan Bukaanada Uqalma Caawimada Dhaqaalaha: Ma jiro bukaan xaq uleh qaybaha kor kuxusan wax kamid ah ee caawimaada kaasoo si shaqsi ah looga qaadi karo wax kabadan boqolkiiba "Cadadka Caadiyan Laga Qaado" (AGAB) ee qarashaadka guud ee kubaxa, sida hoos ucad.

Qorshaha Qarash bixinta oo Macquull ah: Marka bukaanka loo ansixiyo caawimaad dhaqaale oo qayb ahaan ah, laakiin wali lagu leeyahay baaqi, SHS axay kala hadlayaa bukaanka hanaan tartiib loogubixiyo lacagta. Qorshaha Qarash bixinta oo Macquull ah waa inuu ka koobnaadaa qarashaad bilkasta lla bixinayo kuwaasoo aan kabadnayn 10 boqolkiiba lacagta soo gasha bishii qoyska bukaanka, marka laga reebo lacagaha kubaxa Qarashaadka Aasaasiyaadka Nolosha kuwaasoo bukaanku uu kuqoray codsigiisa caawimaada.

Biilka iyo Soo aruurinta Biilasha: Wixii baaqiyo aan wali la bixin ah oo lagu leeyahay bukaanka ama wakiilkiisa kadib markii qiima dhimis loo sameeyay, hadayba jirtay, ayaa laga dalban karaa in bukaanku dhiibo. Dadaalada soo aruurinta baaqiyada aan wali la bixin waxay joojinayaan go'aanka kama danbaysta ah ee rahman ee uqalma FAP. SHS ma samayso, mana ogolaanayso ama uma ogolaanayso in wakaaladaha dayn aruurintu fuliyaan wax talaabooyin dheeraad ah oo lacagta lagusoo aruurinaayo kahor mid kood: (a) intaan lasamayn dadaalo ku haboon si loo go'aansho in bukaanku uqalmo iyo in kale caawimaad dhaqaale; ama (b) 10 maalmood kadib marka bayaanka bukaanka ee koobaad la soodiro. Si aad uhesho macluumaadka laxariira biil qaadista iyo shaqooyinka lacag aruurinta ee cadadka lacagta lagu leeyahay bukaanada, fadlan kafiiri xeerka isbitaalka SHS, kaasoo aad si bilaash ah uga helayso xafiiska diiwaangalinta ee xarun kasta oo SHS katirsan, ama waxaad kahelaysaa: www.swedish.org**.**

Lacagaha loo celiyo Bukaanka: Marka bukaan ama wakiilka bukaanku uu bixiyo qarashaadka adeegyada kadibna hadhow mar dambe laga go'aansho inuu xaq ulahaa daryeel bilaash ah ama qiimo jaban, qarash kasta oo ladhiibay lana xariira adeegyadaas inta lagu jiray mudada uu bukaanka uqalmay FAP taasoo kabadan qarashka waajibka ku ah bukaanka waa loo celinayaa, si waafaqsan xeerarka gobalka.

Dib u eegista Sanadlaha ah: Fulinta Xeerkaan Caawimada Dhaqaalaha (Deeqda Daryeelka) waxaa lagu samaynayaa dib u eegis sanad kasta waxaan ku samaynaaya hogaan loo diyaarshay oo katirsan Mareegta Dakhliyada.

ARIMAHA REEBAN:

Fiiri Cabirka Kore:

QEEXITAANADA:

Ayadoo laga raacaayo ahdaafka xerkan qeexitaanada iyo shuruudaha soo socda ayaa ka qusaynaaya:

1. Federal Poverty Level (FPL, Heerka Fakhriga Federaalka): FPL waxaa looga jeedaa tusmooyinka fakhriga kuwaasoo marar wax laga badalo kuna jira Diiwaanka Federaalka ee United States Department of Health and Human Services (Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Dadka ee Maraynkan).

2. Amounts Generally Billed (AGB, Cadadka Caadiyan Laga Qaado Bukaanka): Cadadka lacageed ee caadiyan laga qaado bukaanada la siiyo adeegyada degdega ah iyo daryeelka caafimaad ahaan muhiimka ah kuwaasoo leh caymis caafimaad ayaa xeerkan dhexdiisa loogu yeeraa AGAB SHS waxay go'aaminaysa boqlkiiba cadadka AGAB ee laqaadaayo ayadoo ku dhufanaysa qarashaadka guud ee isbitaalku bukaankaas uga qaadaayo daryeel degdeg ah ama caafimaad ahaan muhiim ah una dhufanaysa cadad boqolkiiba go'an kaasoo lagu salaynaayo caymiyo lagu ogolyahay Medicare. Waraaqaha macluumaadka oo sharaxaad kabixinaaya boqoleeyda AGAB, iyo sida loo xisaabsho, ayaad kaheli kartaa adoo booqanaaya webseetka soo socda: www.swedish.org ama adoo wacaaya **1-866-747-2455** si aad udalbato koobi

3. Extraordinary Collection Action (ECA, Talabada Lacag aruurinta Aan Caadiga ahayn): ECA waxaa lagu qeexaa talaabooyinka ubaahan hanaan sharci ama garsoor, waxayna la xariiraan in daynta laga iibsho qolo sadexaad ama in macluumaad dhib ukeenaaya bukaanka loo diro wakaaladah daynta ama laamaha. Talaabooyinka ubaahan hanaan sharci ama garsoor oo arintan la xariira waxaa kamid ah lawareegida hantida; iibinta hantida maguurtada ah; gacanta kuhaynta ama lawareegida koontada bangiyada ama hantida kale ee shaqsiga ah; qaadista talaabo dacwad madani ah oo kadhan ah qofka; talaabo keenaysa in qofka la xiro; talaabooyin keenaaya in qofka dusha lagala socdo; in mushaharka qofka lagoosto.

Tixraacyada

Internal Revenue Code Section 501(r); 26 C.F.R. 1.501(r)(1) – 1.501(r)(7)
Washington Administrative Code (WAC) Chapter 246-453
Revised Code of Washington (RCW) Chapter 70.170.060
Emergency Medical Treatment and Labor Act (EMTALA), 42 U.S.C. 1395dd
42 C.F.R. 482.55 and 413.89
American Hospital Associations Charity Guidelines
Providence St. Joseph Health Commitment to the Uninsured Guidelines
Provider Reimbursement Manual, Part I, Chapter 3, Section 312

Tusmada A – Liiska Xarumaha Kujira Xeerka

Isbitaalada SHS oo kuyaala Washington	
Swedish Medical Center First Hill/Ballard	Swedish Medical Center Cherry Hill
Swedish Issaquah	Swedish Edmonds

Tusmada B - Shuruudaha Dhaqaalaha ee Isbitaalada SHS

Waqtiyada Kago'aan gaarista Dhaqaalaha: Dhaqalaha sanadkii soogala qoyska ayaa go'aan laga gaarayaa marka adeegyada isbitaalku siiyo bukaanka, ama xiliga codsiga lasoo dirsado haddii codsiga la soo diray labo sano gudahood markii adeegyada labaxshay bukaankuna uu samaynaayay dadaalada ku haboon oo daacadnimo leh si uu uraadiyo cid ka bixisa qarashaadka adeegyada.

Haddii...	**Kadib ...**
Dhaqalaha qoyska soogala sanadkii, oo waafaqsan tirada qoyska, uu yahay ama kahooseeyo 300% tusmooyinka cabirada hadda udagsan FPL,	Waxaa la go'aaminayaa bukaanku inuu dhaqaale ahaan sabool yahay, uuna uqalmo caawimaad dhaqaale oo ah in 100% laga dhaafo lacagta masuulka uu kayahay inuu bixiyo bukaanku.[1]
Dhaqalaha qoyska soogala sanadkii, oo waafaqsan tirada qoyska, uu udhaxeeyo 301% iyo 400% tusmooyinka cabirada hadda udagsan FPL,	Bukaanku wuxuu uqalmaa qiimo dhimis dhan 75% oo laga jaraayo qarashaadkii markii hore laga rabay inuu bukaanku dhiibo.
Haddii dhaqaalaha qoyska soogala sanadkii, oo waafaqsan tirada qoyska, uu yahay ama ka hooseeyo 400% cabirka FPL IYO bukaanku uu baxiyey dhammaan qarashaadka caafimaadka 12 kii bilood ee lasoo dhaafay taasoo 20% kabadan dhaqalaaha soogala qoyska sanadkii, oo waafaqsan tirada qoyska, uuna kubaxiyey adeegyo quseeya xeerkan,	Bukaanku wuxuu u qalmaa qiimo dhimis dhan 100% oo laga jaraayo qarashaadkii laga rabay inuu bukaanku dhiibo.

[1] si waafaqsan WAC Ch. 246-453, marka laxaqiijiyo in shaqsiyaadka noocaas ah aysan xaq ulahayn qolo sadexaad oo qarashaadka bixisa (fiiri RCW 70.170.020(5) iyo 70.170.060(5)).